

## Kaalmo ka hel Su'aalaha Waxbarashadda Gaarka ah

### Hordhac

Kooxaha IEP ayaa mas'uul ka ah inay gaaraan go'aamo badan oo muhiim ah oo la xiriira waxbarashadda ardayda la tacaalaya naafanimada. Inta badan, kooxahani waxa ay awoodaan in ay si guul leh uga heshiiyaan barnaamijka Waxbarashadda Shakhsi ahaaneed (IEP) kaas oo u suurtageliya ardaygu in uu helo waxbarashadda dadweynaha oo ku habboon oo bilaash ah (FAPE).

Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira waqtiyo aysan kooxuhu ku heshiin karin oo khilaaf uu soo baxo. ODE waxay ku dhiirigelisaa waalidiinta iyo barayaasha inay si wadajir ah u xalliyaan welwelka la xiriira barnaamijka waxbarashadda gaarka ah ee ardayga, laakiin waxay fahamsan yihiin inay jiraan waqtiyo taageero dheeraad ah loo baahan yahay. ODE waxay bixisaa doorashooyin badan si ay uga caawiyaan waalidiinta iyo dugsiyada degmooyinku inay xalliyaan khilaafyadda la xidhiidha waxbarashadda gaarka ah. ODE waxa kale oo ay leedahay khabiro loo xilsaaray degmo dugsiyeed kasta kuwaas oo diyaar u ah inay kaa caawiyaan inaad fahamto xuquuqdaadda iyo hababkan haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyio xulashada doorashooyinkaaggaa.

### Helitaanka Caawinta

#### 1. La hadal macalinka ilmahaagga

In kasta oo degmo dugsiyeed kasta oo Oregon ku taal ay leedahay xaalad gaar ah, guud ahaan, waalidiinta iyo xubnaha qoysku waa inay marka hore la hadlaan macalinka ilmahaagga si ay u helaan caawimo. Inta badan, macalinka cunugga ayaa si fiican ugu qalabaysan inuu xalliyo walaacyada marka ay soo baxaan.

#### 2. La shaqee Maareeyaha Kiiska

Arday badan oo hela adeegyadda waxbarashadda gaarka ah ayaa sidoo kale leh maamule kiis oo uu u xilsaaray dugsigoodu. Qofkani inta badan waa macalinka waxbarashadda gaarka ah ee ilmaha. Maareeyayaasha kiiska ayaa mas'uul ka ah inay la shaqeeyaa nidaamka IEP kooxaha IEP ee ardaydooda. Haddii macalinka fasalka ilmahaagu aanu awoodin inuu xalliyi walaacyadaadda, maareeyaha kiiska waxbarashadda gaarka ah ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyi.

#### 3. Dhibaatadda uu Xaliyo Maamulka Dugsigu

Dugsiyadu sidoo kale caadiyan waxay leeyihiiin maamulayaal ku salaysan dugsigga (tusaale, maamulayaal, maamule ku xigeen) kuwaas oo ka masuul ka ah hubinta hawl-maalmeedka dugsigga ee waxtarka leh. Xaaladaha ay macalimiintu xallin kari waayaan welwelka qoyska, hoggaanka dugsigga ku salaysan ayaa badanaa ku caawin kara.

#### 4. Taageero ka raadso xafiiska degmada

Marka shaqaalaha dugsiga ku salaysan ay awoodi waayeen in ay xaliyaan welwelkaaggaa, sida caadiga ah waxaa jira heer kale oo kormeerka degmada iyada oo loo marayo xafiiska

dhexe. Labadaba xafiiska waxbarashadda gaarka ah, oo laga yaabo in loogu yeero adeegyadda ardayda ama magac kale oo la mid ah, iyo xafiiska kormeeraha Dugsigga degmadaadda ayaa inta badan awood u yeelan doona inuu kaa caawiyo xallinta welwelkaagga marka shaqaalaha dugsigga ku saleysan ay awoodi waayeen inay sidaas sameeyaan.

#### **5. La shaqee Xarunta Macluumaadka iyo Tababarka Waalidka ee Oregon**

Oregon waxa ay sii haysaa Xarunta Tababarka iyo Macluumaadka Waalidka (PTI) iyada oo la sii marayo [FACT Oregon](#). FACT Oregon waxay siisaa taageero asaageed, tababaro, iyo agab si ay u qalabeeyaan oo ay awood ugu yeeshaan qoysaska, u beddelaan sida ay u arkaan naafso, ugana caawiyaan inay rajooyin sare yeeshaan oo ay ku riyoodaan ryooyin waaweyn oo carruurtooda ah. Shaqaalaha FACT Oregon waxay siiya taageero qoysaska si ay ugu socdaan naafada iyo waxbarashadda gaarka ah. Oregon's PTI waxa ay ilaalisaa siyaabo badan oo waalidiinta iyo qoysasku ku helaan taageero, oo ay ku jirto in la waco 503-786-6082 ama 541-695-5416, ama la diro iimaylka [support@factoregon.org](mailto:support@factoregon.org), [scheduling a call via their website](#).

#### **6. La xidhiidh Xafiiska Horumarinta Fursadaha Ardayga ee Waaxda Waxbarashadda ee Oregon**

Fadlan sidoo kale xor u noqo inaad la xiriirto shaqaalaha Xafiiska Horumarinta Fursadaha Ardayga si aad taageero u hesho. Wuxaa nagala soo xidhiidhi kartaa iimaylka [ode.specialeducationquestions@ode.oregon.gov](mailto:ode.specialeducationquestions@ode.oregon.gov) ama telefoonka 503-947-5600. Fadlan hubi inaad ku darto dugsiga degmadda ilmahaagga si ay nooga caawiyaan inaan kugu xidhno xubinta shaqaalaha ee ku habboon. Haddii kale, wuxaa halkan [ku soo gudbin kartaa codsi gargaar ODE](#).

### **Macluumaad Dheeraad ah**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda waalidka ardayga naafanimadda qaba ayaa laga heli karaa [Ilaalinta Habraaca](#).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xalinta khilaafaadka ayaa sidoo kale laga heli karaa ODE's [Goobta Xallinta Khilaafaadka](#).